

# Is-nidaamis 'Scabies'

Taariikhda:

Gacaliye Waalid ama Wakiil,

Ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu qaaday **isnidaamis** intii uu joogay xanaanada ilmaha.

## Waa maxay isnidaamisku?

Is-nidaamisku waa cayayaan yaryar oo ku tarma maqaarka hoostiisa.

## Waa maxay calaamadaha lagu garto isnidaamiska?

- Cuncun badan, oo uu ugu daran habeenkii.
- Xariijimo, buurbuur iyo nabaro guduuduma, gaar ahaan meelaha maqarku ka laabmo (faraha dhexdooda, suulasha, suxulada, gacmaha hoostooda, jilibka dhabarkiisa, xiniinyaha, iyo caloosha).
- Caruurta yaryar, finan madaxa, qoorta, baabacooyinka, suulasha lugaha, ama jidhka oo dhan.

## Intee ayey gaadhsiisan tahay dhibaataada xanuunka isnidaamisku?

Is-nidaamisku waa uu dhib badan yahay, laakiin halis ma aha. (Is-xogidda ayaa marmar keenta infekshan maqaarka gala.)

## Siduu qofku ugu dhici karaa isnidaamiska?

Is-nidaamisku wuxu ku fidaa maqaarka dadka oo is taabta. Qofku wuxuu kale ka qaadi karaa isnidaamiska tuwaalada. Googosha, ama dharka qofka qaba isnidaamiska. (Dadku kama qaadaan isnidaamiska xayawaanka carbiska, xayawaanku waxay leeyihiin nooc kale oo loo yaqaan 'mange'.)

## Intee in le'eg ayey ku qaadataa inuu ku qaado isnidaamis marka la is-taabto qofka qaba isnidaamiska kaddib?

Qofka aan weligii qaadin isnidaamis wuxuu kuu yeelanaya calaamadaha 4-6 toddobaad kaddib taabashada qofka ama shayga qaba isnidaamiska. Qofka hore u qaaday isnidaamis wuxu ku yeelanayaa calaamadaha muddo maalmo ah kaddib la kualnka isnidaamiska.

## Goorma ayaa qofka qaba xanuunka Isnidaamiska uu cid qaadi karaa?

Qofka qaba is-nidaamiska waa laga qaadi kara ilaa inta laga dawaynayo.

## Sideen uga ilaalin karaa ilmahaaga ama kuwa kaleba inay qaadaan isnidaamis?

- Iska jir taabashada dheer ee maqaar ilaa maqaar qof qaba isnidaamis.
- Ka hubi calaamadaha qof kasta oo maqaarkiisu taabtay maqaarka qof qaba isnidaamis.
- Ha la wadaagin tuwaalada, marooyinka, gogosha ama dharka aan dhaqnayn qof kale.
- Ku dhaq gogosha, dharka, dharka qubayska iyo tuwaalada uu isticmaalay qofka qaba isnidaamisku biyo kulul oo ku qalaji qalajiso kulul. Ku dar dhammaan tuwaalada, gogosha iyo dharka la isticmaalay ugu yaraan 4 maalmood kaddib daaweynta.
- Ku rid dharka aan la maydhi karin bac oo aad ugu xidh ugu yaraan ilaa 7 maalmood.
- Kaarbatyada fakuyum mari, roogaga iyo kuraasta iyo gogosha.

## Maxay tahay daawada isnidaamisku?

Isnidaamiska waxa lagu daweyaa kareemooyin dila cayayaanka. Dawooyinka dabciya cuncunka ayaa iyana loo baahan yahay. (Fadlan buuxi foomka ogolaanshaha daawada wixii daawo cuncun ee la marinayo ilmahaaga xanaanada dhexdeeda.) Is-nidaamisku kuma tago dawo la'aan.

## Haddii ilmahaagu qaado xanuunka isnidaamiska, inuu ka joogo miyaa xanaanada ilmaha?

Haa, illaa daawadu bilaabmayso.

